

Wilma-oppilasjärjestelmä käyttöön esi- ja perusopetuksessa 1.8.2020 alkaen

Nidaamka maareynta ardayga ee Wilma ayaa lagu soo kordhiyay waxbarashada gogoldhigga ah iyo mida aasaasiga intaba laga bilaabo 1.8.2020.

Nidaamka maaraynta ardayda ee Wilma wuxuu ka dhaqan gali doonaa waxbarashada gogoldhigga iyo mida aasaasiga ah ee magaalada Tampere bilowga sanad dugsiyeedka 2020 - 2021. Nidaamka hadda jira ee "Helmi" waxaa isticmaalkiisa la joojin doonaa 31.07.2020.

Mas'uulka ama waalidka ardeyga ee waxbarashada gogoldhigga iyo mida aasaasiga ah waxay magaca isticmaale (käyttäjätunnus) iskooda uga sameeynaayaan nidaamka maareynta ardayda ee Wilma kahor bilowga sanad dugsiyeedka 2020 - 2021. Magaca isticmaalaha (käyttäjätunnus) waxaa la abuurin karaa wixii ka dambeeyo 1.8.2020. Waxaad ku gali kartaa Wilma adigoo adeegsanaya adeegga aqoonsigiisa xooggan yahay ee loo yaqaano Suomi.fi. Waxaad u baahan tahay adeegyada kala xaqiijinta moobaylka, Aqoonsi bangi, ama kaarka xaqiijinta si aad u gasho. Kaliya aqoonsiga xooggan ayaa macluumaadka cunugga lagu xiriirin karaa aqoonsigiisa / keeda. Tan waxaa loo yaqaan oggolaansho.

Waalidka ama mas'uulka kale ee aan awoodin adeegsiga aqoonsiga xooggan, laakiin rabaan adeegyada Wilma waxay horraanta sanad dugsiyeedka ka codsan karaan dugsiya ilmaha uu ka tirsan yahay furaha nambarka gaar ah si loo abuurto magaca isticmaalaha. Qofka aan ahayn mas'uulka rasmiga ah ee ilmaha, laakiin leh waxa loogu yeero xuquuqda helitaanka arrimaha ilmaha, waxay sidoo kale heli doonaan furaha nambarka ee loogu talagalay samaynta magaca isticmaalaha ee Wilma, waxbarashada gogoldhigga iyo mida aasaasiga bilowga sannad dugsiyeedka haddii uu leeyahay oggolaanshaha qoraalka ah ee mas'uulka rasmiga ah.

- Mas'uulka ama waalidka ku shaqeynaayo Macalinnimo ama ah shaqaale ka tirsan waxbarashada gogoldhigga iyo mida aasaasiga ah ee magaalada Tampere, kaasoo ubadkiisa ay dhigtaan dugsiyada kala duwan ee magaalada waxay cinwaanka magaca isticmaalaha ku sameyn karaan mid iyaga u gaar ah oo aan aheyn cinwaanka shaqada.
- Mas'uulka ama waalidka horey u lahaa magaca isticmaalaha ee Wilma, isagoo goobta shaqadiisa looga sameeyay ama ubad kale horey ugu sameeystay waa in uu markale si caadi ah u abuurto magaca isticmaalaha waxbarashada gogoldhigga iyo mida aasaasiga ah ee magaalada Tampere. Inkastoo nidaamka isku mid yahay, balse degmooyinka iyo heerka labaad ee waxbarashada xog uruurinta mid walba waa u gaar ah.

Dhammaan waalidiinta waa inay sameeystaan magaca isticmaalaha ee Wilma oo cusub, waxaana loogu talagalay dugsiyada gogoldhigga iyo kuwa aasaasiga ah ee nidaamka Wilma, xitaa haddii waalidka horey u lahaa magaca isticmaalaha waa in uu sameeystaa mid cusub.

Ohjeet tunnusten luomiseen ja omien lapsien liittäminen tunnukseen

Tilmaamaha loogu talagalay abuurista magaca isticmaalaha (käyttäjätunnus) iyo ku lifaaqidda carruurtaada isticmaalahaas.

Xaqiijinta aqoonsiga xooggan ee waalidka iyo ogolaanshaha.

Wilma waxaa lagu galaa waxa loogu yeero xaqiijin xoogan iyada oo loo marayo adeegyada Suomi.fi. Si aad u gasho, waxaad u baahan tahay xaqiijinta moobaylka, aqoonsi bangi, ama kaarka xaqiijinta. Kaliya qofka leh aqoonsigaan xoogga leh ayaa caruurtiisa ku xiriirin kara aqoonsigiisa / keeda. Tan waxaa loo yaqaan oggolaansho.

Xaqiijinta xooggan iyo talaabooyinka oggolaanshaha.

1. Wilma kasoo gal cinwaankaan:

opetustampere.inschool.fi/connect

2. Qor cinwaanka iimaylkaaga kadib "dir farriin xaqiijin ah".

- a. fur iimaylkaaga -> kadib fur farriinta xaqiijinta ee Wilma, intaas kadib dhagsii si aad usii wado abuurida koontada.
- b. fiuro gaar ah! Haddii fariintu aysan kasoo muuqan iimaylkaaga, fadlan ka raadi santuuqa ay kusoo dhacaan fariimaha qashinka.

3. Ka dooro iskuulka ilmahaaga liiska kadibna riix ku xiga (seuraava). Soo diyaarso kaararka aqoonsiga bangiga ee internetka ama xaqiijinta moobiilka ee taleefankaaga.

- a. Kadib gudagal sameynta xaqiijinta xooggan

4. Ka gal bangigaaga internetka.

- a. Ka dooro daaqada kuu furmeysa "Macluumaadka waalidka ee laga helaayo xarunta diiwaangelinta dadka".
- b. Riix badhanka "hae huollettavasi". Nidaamka wuxuu kugu hagaayaa adeegga suomi.fi, halkaas oo aad ka dooran karto ilmahaaga dhigta waxbarashada aasaasiga ah ee magaalada Tampere.
- c. Waxaa dooran kartaa hal cunug keliya markiiba.
- d. Waxaad dooran kartaa caruur kale adigoo gujinaya mar kale "Macluumaadka waalidka ee laga heli karo xarunta diiwaanka dadweynaha" si aad u doorato ilmaha ku xiga.
- e. Marka boggaas ay kaaga soo muuqdaan magaca isticmaalaha wilma / nambarka koodhka dhammaan caruurta aad mas'uulka ka tahay, dhanka hoose ka dooro ama guji "seuraava".

5. Raac tilmaamaha Wilma.

- a. Hubi macluumaadkaaga
- b. Wilma u sameyso lambarka sirta ah (lambarka sirta ah waa inuu ahaadaa ugu yaraan dhirirkiisa siddeed calaamadood oo ay ku jiraan ugu yaraan saddex ka mid ah waxyaabaha soo socda: xaraf weyn, xaraf yar, tirooyin ama astaamaha gaarka ah).
- c. Fadlan hubi macluumaadka aad galisay oo samee magaca isticmaalaha.
- d. Cinwaanka iimaylkaaga ee aad ina siisay ayaa kuu noqon doona magaca isticmaalaha Wilma.

Galitaanka Wilma iyada oo loo marayo bogagga kala duwan ee internetka:

Mar alla markii aad samaysato magaca isticmaalaha ee Wilma, waxaad gali kartaa Wilma adoo adeegsanaya boggaan ku xusan hoos:

<https://opetustampere.inschool.fi>

Soo degsashada barnaamijka moobiilka iyo galitaanka barnaamijka.

1. Kasoo raadi barnaamijka moobiilka ee Wilma dukaamada kala ah Google Play ama App Store
2. Iskaaga usoo dejiso barnaamijka
3. Ku gal barnaamijka adigoo adeegsanaya magaca isticmaalaha iyo lambarkaaga sirta ah.
4. Ka dooro Wilma: Magaalada Tampere (Tampereen kaupunki), kadib dooro waxbarashada aasaasiga ah (perusopetus).

Tilmaamaha qaabka loo xiriiriyo marka ay badan yihiin magacyada isticmaalaha ee kujira barnaamijka moobilka ee Wilma.

Codsiga kuugu dagan moobiilka, waxaa la isugu geyn karaa dhammaan magacyada isticmaalaha, iyadoon loo eegeyn degmada / machadka waxbarashada.

Haddii waalidka leeyahay magaca isticmaalaha loogu talagalay Wilma kale (tusaale ahaan, degmada deriska ah, waxbarashada heerka labaad ama dugsiga farsamada gacanta ee Näpsä):

1. Fur barnaamijka hadda taleefanka gacanta kuugu dagan ee Wilma.
2. Liiska dul tag oo dooro magacyada Istimaalaha (käyttäjätilit)
3. Ku dar cinwaan cusub oo Wilma ah, riix badhanka + (lisää) intaas kadib (ka dooro Wilma = valitse Wilma)
4. Ka raadi liiska daaqada kuu furantay magaalada Tampere, intaas kadib dooro waxbarashada aasaasiga ah.
5. Ku gal magaca isticmaalaha cusub ee Wilma ee aad u sameeystay waxbarashada gogoldhigga iyo waxbarashada aasaasiga ah ee Tampere.
6. Sidaas, waxaad isugu dari kartaa magacyada isticmaalaha Wilma ee kala duwan iyadoo aan loo eegin degmada / machadka waxbarashada.
7. Boggaan Istimaalaha (Käyttäjätili-sivun) ayaa had iyo goor kuu oggolaanaya inaad doorato cidda aad boggiisa isticmaaleyso

Codsiga kuugu dagan moobiilka magacyada isticmaalaha marka aad gasho waa kujiraayqq, sidaa darteed isticmaalaha wuxuu isku beddeli karaa magacyada / doorarka bogga isticmaalaha.